BOSTON Public Schools
**Waaxda Maaliyadda**
***David Bloom, Sarkaalka ugu Sarreeya Maaliyada***
2300 Washington Street
Roxbury, Massachusetts 02119
www.BostonPublicSchools.org/Budget

---

**KUSOCOTA:** Guddiga Dugsiga

**KA SOCOTA:** David Bloom, Sarkaalka ugu Sarreeya Maaliyada

**TAARIIKHDA:** Diiseembar 18keeda, 2024

**UJEEDO:** Wargalinta Dhaqaalaha

----------------------------------------------------------------------------------------------------

Guddoomiyaha iyo Xubnaha Guddiga Dugsiga,

Soo jeedinta waxay siinaysaa warbixinta maaliyadeed ee Dugsiyada Dadweynaha Boston (BPS) ee sanad xisaabeedka 2023-24, 2024-25 iyo 2025-26. Soo jeedinta gudaheeda waxaan falanqayn doonaa:

- **FY24 Kudhawaad mashruuca:** BPS waxay ku dhammaatay sanadka miisaaniyada 34aad oo xidhiidh ah.
- **FY25 Saadaasha Maaliyadeed iyo Xidhitaanka ESSER:**
  - Ka sareeya kharashaadka la filayay ee dhinacyada adeegyada cuntada, shaqaalaha galinka shaqeeya, iyo caymiska caafimaadaka.
  - Ka hooseeya kharashaadka la filayay ee dhinacyada shaqaalaha labada galin shaqeeya mushaharadooda iyo isticmaalka maalgalinta ESSER si loo dhimo kharashaadka kordhaya.
- **Warbixinaha Maalgalinta Miisaaniyada FY25** iyadoo diirada la saarayo hawlaha loo dhan yahay, barnaamijyada labada luuqaddood, xarumaha dugsiyada, aqoonta loo siman yahay, shaqaalaysiinta, qorshaynta dhismayaasha muddada dheer jiraya, iyo khadka caawinta qoyska.
- **Isdiwaangalinta Socota:** Isdiwaangalinta BPS waxay noqotay mid xasiloon kadib hoos u dhac ay ku jirtay tobankii sano ee lasoo dhaafay.
- **Hordhaca Miisaaniyada FY26:** Iyadoo mudnaanta la siinayo xasiloonida miisaaniyada dugsiga iyo maalgalinta ardayda baahiyaha badan qabta, oo ay ku jiraan hawlaha loo dhan yahay iyo waxbarashada labada luuqaddood.

Iyadoo la eegayo qoraalkan, waxaad heli doontaa saddex dhokumanti:

- **Soo Jeedinta Warbixinta Maaliyadeed**
- **Qoraal lagusoo koobayo odoraskayaga maaliyadeed ee FY25 sida ku xusan 10.31.24**
- **Shax faahfaahsan oo ay weheliso odoroskayaga maaliyadeed ee sanadka FY25**

Guud ahaan, soo jeedintu waxay hoosta ka xariiqaysaa xasiloonida maaliyadeed, istaraatijiyada maalgalinta, iyo qorshaha mustaqbalka. Waxaan rejaynayaa inay guddigu wax ka qabato oo ay qaadato su'aalahaaga.

Si daacadnimo ah,

David Bloom